



Xuquuqda Dastuuriga iyo Sharciga ah ee Dhibanaha ee Oregon ee loogu talagalay Dhibbanayaasha Eexda

Guudmar Aan Dhammeystirnayn

Oregon Department of Justice's

CIVIL RIGHTS UNIT



Afeef

Macluumaadka ku jira PowerPoint-kani kama dhigna talo sharci ah mana aha beddelka la tashiga ama sii haysashada qareen.

Khadka Ka Jawaabida Eexdu awood uma laha in uu talo sharci ah siiyo qof kasta oo soo sheegaya dhacdada eexda ama dembiga eexda.

Xiriirka qareenka-macmiilka ama mudnaantu waxaa la dejiyaa iyada oo la adeegsanayo warbixin, xog wadaag, ama dib u eegis lagu sameeyo macluumaadkani.

Khadka Ka Jawaabida Eexda ee Gobolka Oregon

Khadka Ka Jawaabida Eexda
(khadka aan ahayn xaalada degdega ah)

1-844-924-BIAS (2427)

Isniinta-Jimcaha, 9 subaxnimo-5galabnimo

Turjumaad ku qoran 240+ luqaddood

Waan Aqbalnaa Wicitaanada Gudbinta oo Dhan

Wakhti kasta ku soo sheeg dhanka internet-ka

StandAgainstHate.Oregon.gov

Qeexida Dhibbanaha: Dastuuri ah

OR Const Art I § 42 (6)(c)

“Victim” macnaheeda waa qof kasta oo uu go’aamiyay qareenka wax ciqaabaya ama maxkamad in ay soo gaartay waxyeello dhaqaale oo toos ah, nafsad ahaaneed ama jireed oo ka dhashay dembi iyo, xaalada ah qof dhibbane ah oo yar, mas’uulka sharciga ah ee qofka yar.

Qeexida Dhibbanaha: Sharciga

[ORS 137.007](#)

...“Victim” macnaheeda waa qofka ama dadka ay soo gaareen waxyeello dhaqaale oo toos ah, nafsad ahaaneed ama jireed oo ka dhashay dembi oo ay ku jiraan, xaalada ah dil ama ku xad gudubka maydka heer kasta ka ahaadee, ee qoyska dhow marxuumka iyo, xaalada qof dhibbane ah oo yar, mas’uulka sharciga ah ee qofka yar. Ma aha in ku eedaysanaha dembiilanimo loo tixgeliyo in uu yahay dhibbane.

Macluumaad Guud: U soo sheegida hay'adaha dhaqangelinta sharciga

(kuwani farsamo ahaan ma aha xuquuq)

- Dhibbanayaasha ma aha in ay ogaadaan haddii wax yihiin dembiga eexda vs dhacdada eexda.
- Dhibbanayaasha waxay dooran karaan goorta, halka, sida loo sheegayo.
- Dhibbanayaashu waxay codsan karaan in la geliyo diiwaanka booliska ama warbixinta dhacdada. Warbixinadu waxaa dhici karta:
 - in ay dhisaan kiisaska caddeynta ujeedada ka dambeysa eexda oo dheeraad ah/mustaqbalka oo ka dhan ah dembiile isku mid ah, ama
 - in lagu aqoonsado qaababka ama isku xidhka kiisaska aan hore iskugu xidhnayn.
 - Ogow: booliska loogama baahna in ay qoraan warbixin ku saabsan dhacdada eexda.
- Dhibbanayaasha ma aha in ay yeeshaan wax ogaansho ah ama garanayaan qofka uu yahay dembiiluhu.

Waxyaabaha u kala dooran karo Qofka dhibbanaha ah: Ka dib U soo sheegida Hay'adaha Dhaqangelinta Sharciga (ma aha xuquuq)

- Wuxuu codsan karaa in uu yeesho biilasha **daaweynta**-dembiga la xiriirta ee caafimaadka, la talinka iyo aaska/xabaalista uusan daboolin caymis ee uu daboolo [Barnaamijka Magdhowga Dhibbanaha Fal demiyeedka \(CVCP\)](#) ee gobolka. (ORS 147.005)
- Wuxuu codsan karaa in uu yeesho kharashaadka **dhacdada eexda**- la xiriirta ee la talinka oo uusan daboolin caymis ee uu daboolo [Barnaamijka Magdhowga Dhibbanaha Fal demiyeedka \(CVCP\)](#) ee gobolka.
- Dhibbanayaasha dhaqdhaqaaqa fal dembiyeedka ee aanan ahayn muwaadiniin ama aanan haysan xaalada deganaansho oo joogto ah ee gacan siiya hay'adaha dhaqangelinta sharciga ee dhanka baaritaanka ama dacwad isku soo oogista waxaa dhici karta in ay xaq u yeeshaan joogitaanka ku meel gaarka ah ee Maraykanka oo loo yaqaano Xaalada Aan-muhaajirka ahayn, ama U Visa. (Xeerka Dhibbanaasha ka Ganacsiga Dadka iyo Iska ilaalinta Xad gudubka ee 2000, 8 U.S.C. § 1184, 8 U.S.C. § 1101(a)(15)(U))

Waxyaabaha u kala dooran karo Qofka dhibbanaha ah: Ka dib U soo sheegida Hay'adaha Dhaqangelinta Sharciga

(ma aha xuquuq)

- Dhibbanayaasha da'doodu tahay 65+ ama naafada ah waxay ka codsan karaan maxkamadda in ay soo saarto amarka ilaalinta madaniga ah (oo loo yaqaano amarka xakameynta 'restraining order') oo ka baxsan kiis kasta oo dembiyeed, ka dhan ah dembiilaha eexda ee isticmaalay hadal nacayb ah, hadalo cay ah, magacyo, jeesjees, hanjabaado, habaar, ama cabsi gelin ka dhan ah iyaga. (ORS 124.010)
- Haddii eexdu ka dhigan tahay daba gurka qofka 'stalking' (xiriir soo noqnoqda, oo aan la rabin oo gelisa cabsida ay ka qabaan khatar jireed oo degdeg ah) oo dhacday 2 sano ee la soo dhaafay, ka dib qofka dhibbanaha ahi wuxuu, ka baxsan kiis kasta oo dembi ah, ka codsan karaa maxkamadda in ay soo saarto amarka ilaalinta madaniga ah ee daba gurka qofka 'stalk' oo ka dhan ah dembiilaha eexda.

Waxyaabaha u kala dooran karo Qofka dhibbanaha ah: Socda

(ma aha xuquuq)

- Haddii eexdu ka dhigan tahay daba gurka qofka ‘stalking’ (xiriir soo noqnoqda, oo aan la rabin oo gelisa cabsida ay ka qabaan khatar jireed oo degdeg ah) (ama rabshada guriga ama weerarka dhanka galmada) oo dhacday 90 maalmood ee u dambeeyay, ka dib qofka dhibbanaha ahi wuxuu joojin karaa heshiiskiisa ijaarka ganaax la’aan oo la siiyay ogeysiin qoraal oo 14 maalmood ah iyo caddeynta xad gudubka sida warbixinta booliska, amarka xakameynta ‘restraining order’, ama warqad ka socota adeeg bixiyaha qofka dhibbanaha ah. (ORS 90.453)
- Haddii eexdu ka dhigan tahay daba gurka qofka ‘stalking’ (xiriir soo noqnoqda, oo aan la rabin oo gelisa cabsida ay ka qabaan khatar jireed oo degdeg ah) (ama rabshada guriga ama weerarka dhanka galmada, ama ka ganacsiga galmada), oo qofka dhibbanaha ahina uu dhawaan guuray oo uusan weli qof la wadaagin cinwaankiisa, ka dib qofka dhibbanaha ahi wuxuu codsan karaa in uu ku biiro Barnaamijka Qarsoodinimada Cinwaanka si uu u yeesho cinwaan beddel ah oo ku qoran dhammaan dokumentiyada dadweyne oo uu helo sii gudbinta dhammaan boostada degdega, la aqoonsan yahay ama diiwaangashan. (ORS 192.822)

Waxyaabaha u kala dooran karo Qofka dhibbanaha ah: Socda

(ma aha xuquuq)

- Dadku waxay xaq u leeyihiin in ay ku noolaadaan/u hoydaan, shaqeystaan, dugsi aadaan, codkooda dhiibtaan, heli karaan dukaamada iyo goobaha dadweynaha iyaga oo ka madaxbannaan takoor. (Xeerka Cadaaladda Guryaha ee Federaalka, Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964, Xeerka Dhaqan-celinta, Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka)
- Mulkiile guri wuxuu guriga ka saari karaa dembiilaha dembiga eexda ama dhacdada eexda (ficial ah mid “xadka ka baxsan oo xad dhaaf ah”) iyada oo la haysto ogeysiin 24 saacadood ah. (ORS 90.396 (1)(f)(d) iyo (4))
- In uu fasax macquul ah ka qaato shaqada si uu u helo caawimaada hay’adaha dhaqangelinta sharciga ama sharci, si uu u helo daaweyn caafimaad ama la talin, si uu u helo adeegyada qofka dhibbanaha ah, si uu u guuro, ama guriga looga dhigo mid ammaan ka ah DV/SA, dhibaateynta, ama daba gurka qofka ‘stalking’. (ORS 659A.272)
- In aan laga joojin faa’iidooyinka shaqo la’aanta haddii qofka dhibbanaha ahi uusan lahayn wax beddel ah oo macquul ah oo la heli karo oo uu uga tagi karo shaqo si qofka ama qof yar looga ilaaliyo DV, SA, daba gurka qofka ‘stalking’, ama cabsi gelin dheeraad ah. (ORS 657.176(12))
- In uu fasax macquul ah ka qaato shaqada si uu uga qayb galo dacwad ciqaabeed haddii qofka dhibbanaha ah uu xaq u leeyahay shaqo oo loo shaqeeyuhuna yahay loo shaqeeye la daboolay. (ORS 659A.192.)

Xuquuqda Dhibbanaha: Ka dib u soo sheegida hay'adaha dhaqangelinta sharciga

- In uu yeesho **baaritaan buuxa** ee fal dembiyeed, iyada oo aan la eegayn jinsiyada, midabka, dalka uu ka soo jeedo, aqoonsiga jinsi ahaaneed, dookha galmo, diinta, naafanimada, taariikh dembiyeedka, ama xaalada muwaadinimada/warqadaha ee qofka dhibbanaha ah. (Wax ka beddelka 14-aad ee Qaybta Ilaalinta Loo siman yahay ee Dastuurka Maraykanka)
- In la **ogeysiyo xuqiiqdiisa dhibbane** “sida ugu dhaqsaha badan ee macquulka ah.” (Or Const, Art I, § 42(1)(g); ORS 147.417(1), ORS 147.417(4)(a))
- Haddii la soo sheegayo *dhaqdadaeexda*, in loo **gudbiyo Khadka Ka Jawaabida Eexda ee gobolka** ama Adeegyada Dhibbanaha ee Degaanka oo Loo qalmo (marka la qoondeeyo) si loo helo taageero. (ORS 147.380 (2))

Xuquuqda Dhibbanaha: Guud ahaan Nidaamka Caddaalada Dembiyadda

- In ay LE wax ula dhaqmaan si sharaf iyo ixtiraam lehiyo qof kasta oo kale oo ka tirsan nidaamka caddaalada dembiyadda. (Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1))
- In uu yeesho **turjubaan lacag la'aan ah** iyo in uu helo **waxyaabo lagu turjumay** luqaddo kala duwan, ee uu codsado marka uu gelayo booliska isbitaalada, dugsiyada dadweynaha, iyo barnaamijka dowladda ama hay'ada hela maalgelinta federaalka. (Qoddobka VI ee Sharciga Xuquuqda Dadweynaha, Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka)
- In uu **yeesho turjubaan lacag la'aan ah maxkamadda dhexdeeda**, haddii ay tahay in la marag furayo ama kaliya la dhageysanayo dhageysi maxkamaddeed. (ORS 45.275, ORS 45.285(3), ORS 419C.285(4))
- Haddii la yahay 15 jir ama ka weyn, **in uu yeesho wakiil gaar ahaaneed** (saaxiib/caawiye/qof wax taageera oo la joogo marxalad kasta oo ah nidaamka soo sheegida/hay'adaha dhaqangelinta sharciga/nidaamka caddaalada dembiyadda; wakiilku ma noqon karo qof yar ama markhaatiga dembiga. (ORS 147.425)

Xuquuqda Dhibbanaha: Guud ahaan Nidaamka Caddaalada Dembiyadda

- In uu **diido wareysiga**, qoraalka dhaarta ama codsiga kala ee **wax lagu ogaanayo** ee uu sameeyo ku eedaysanaha dembiilanimo ama qof kale oo ka wakiil ah ku eedaysanaha dembiilanimo.
(Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1)(c))
- In uu **helo qoraalka** dhageysi kasta oo lagu qabto maxkamad furan, haddii mid la diyaariyo.
(Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1)(e), ORS 147.419, ORS 419A.256)

Xuquuqda Dhibbanaha: Guud ahaan Nidaamka Caddaalada Dembiyadda

- In uu **doorto ka qayb qaadashada** nidaamka caddaalada dembiyadda iyada oo la xaqiijinayo xuquuqda dhibbanaha ee in uu bixiyo talo, wax la soo ogeysiiyo, ka qayb galo, oo ka hadlo marka la joogo dhageysiyada qaarkood.
 - Ogow: Amarka imaanshaha maxkamadda 'subpoenas' ee shakhsi ahaan loo diray ayaa ah amar maxkamadeed oo la dhaqan galin karo si looga soo muuqdo maxkamad.
- In uu **door muhiim ah** ku yeesho nidaamka caddaalada dembiyadda. (Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1))
- In si **macquul ah lagaaga ilaaliyo** eedaysanaha inta lagu guda jiro nidaamka caddaalada dembiyadda. (Qoddobka Dastuurka Oregon I § 43 (1)(a))
 - Marka eedaysane la sii daayo inta kiis hawshiisa laga jiro, in uu yeesho amar la soo saaro oo ah in aan xiriir lala yeelan qofka dhibbanaha ah. (ORS 135.970 (4)(a), ORS 419C.276(4))

Xuquuqda Dhibbanaha: Guud ahaan Nidaamka Caddaalada Dembiyadda

- Marka la codsado, in **la soo ogeysiyo waqti hore marxalad kasta oo muhiim ah** ee dacwadaha ee lagu qabto maxkamad furan marka eedaysanuhu joogi doono, oo sidoo kalena tahay in la joogo. (Or Const, Art I, § 42(1)(a); ORS 419C.273(1)(a))
 - Dhageysiga sii deynta
 - Dhageysiga hordhaca ah
 - Gelida in dembiile la yahay ama codsiga in aan diidmo la keenin ‘no contest’
 - Maxkamadeynta
 - Dhageysiyada la xiriira dib u qabashada jadwalka maxkamad isa so taagida
 - Dhageysiyada muquuninta ama ka reebida caddeymaha
 - Xukunka
 - Dhageysiyada la xiriira heshiiska xukunka dib loo dhigay
 - Dhageysiga dib u soo celinta ‘restitution’
- Dhageysiyada codsiyada xukun gaarida ‘motions’ ama codsiyada qoraalka rasmiga ah si wax ka beddel loo sameeyo, meesha looga saaro ama dhinac la iskaga dhigo eedaymo, xukun, amar ama xukun
- Dhageysiga loogu talagalay in la iska khafiifiyo shuruudaha looga baahan yahay in la soo sheego dembiilaha galmo ahaan
- Dhageysiyada ku saabsan qirashada caddeynta dhaqankii hore ee dhibbanaha ama qarinta kiisaska weerarka dhanka galmada
- Ku xad gudubka muddada tijaabada ‘probation’ ama iskala noqoshada (oo loogu talagalay fal dembiyeed yar ‘misdemeanor’ ama dembiyada waaweyn ‘felony’ ee Class A)

Xuquuqda Dhibbanaha: Guud ahaan Nidaamka Caddaalada Dembiyadda

- In uu ka hadlo dhageysiyada ku qoran **qoraalka farta madow** ee hoose:
 - Dhageysiga sii deynta
 - Dhageysiga hordhaca ah
 - **Gelida in dembiile la yahay ama codsiga in aan diidmo la keenin 'no contest'**
 - Maxkamadeynta
 - Dhageysiyada la xiriira dib u qabashada jadwalka maxkamad isa so taagida
 - Dhageysiyada muquuninta ama ka reebida caddeymaha
 - **Xukunka**
 - **Dhageysiyada la xiriira heshiiska xukunka dib loo dhigay**
 - Dhageysiga dib u soo celinta 'restitution'
 - **Dhageysiyada codsiyada xukun gaarida 'motions' ama codsiyada qoraalka rasmiga ah si wax ka beddel loo sameeyo, meesha looga saaro ama dhinac la iskaga dhigo eedaymo, xukun, amar ama xukun**
 - Dhageysiga loogu talagalay in la iska khafiifiyo shuruudaha looga baahan yahay in la soo sheego dembiilaha galmo ahaan
 - Dhageysiyada ku saabsan qirashada caddeynta dhaqankii hore ee dhibbanaha ama qarinta kiisaska weerarka dhanka galmada
 - **Ku xad gudubka muddada tijaabada 'probation' ama iskala noqoshada**
 - **Dhageysiyada xukunka ka dib**
 - **Dhageysiga PSRB**
 - **Dhageysiyada dhallinyarada gaarka ah** (dhageysiyada xirista, hoyga, meelaynta, dabeecada, dib u soo celinta magdhawga 'restitution' iyo dhageysiyada wax iska dhaafida)

Xuquuqda Dhibbanaha: Guud ahaan Nidaamka Caddaalada Dembiyadda

- Marka la codsado, in la lagu wargeliyo **taariikh dembiyeedka eedaysanaya**, oo ay ku jiraan xadhiga, eedaymaha, xukunka, iyo xabsi is gelinta. (Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1)(b), ORS 147.421, ORS 420A.122)
- Marka la codsado, in la lagu wargeliyo **ka sii deynta xabsiga ee eedaysanaha**. (ORS 147.421 (1)(d))
 - Xusuusnow VINE!
- Marka la codsado, in uu weydiisto maxkamadda **in ay dib uga fikirto go'aanka sii deynta** haddii aanan la ogeysiin ama la siin fursad uu talo kaga bixiyo go'aankii hore ee maxkamada sii deynta. (ORS 147.508)
- In uu ka hadlo dhageysiga sii deynta.

Xuquuqda Dhibbanaha: Xukunka

- In la soo ogeysiiyo waqti hore isbeddelka codsiga ‘plea’ iyo xukunka
- In uu ka hadlo beddelaada codsiga ‘plea’ iyo xukunka
- In uu codsado in eedaysanaha lagu amro in uu dib u bixiyo [restitution] wixii khasaare ah, burbur hantiyeed, ama kharakhyada caafimaad ee ka dhasha dembiga. (Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1)(d), ORS 137.106(1), ORS 419C.450(1)(a))
- FYI: Waxaa dhici karta in maxkamaddu amarto ganaaxyo magdhow ah oo dheeraad ku ah sharciga dib u soo celinta magdhawga ‘restitution,’ “iyada oo ah ganaax loogu talagalay kharashka fal-dembiyeedka keenay dhaawac kaasi oo qofka ku dhaawacmay ficilka ka dhigaya dembi wuxuu leeyahay magdhawga khasaare la geystay isaga oo ku guuleystay dacwada.” (ORS 137.101, ORS 419C.459)
- In uu helo macluumaad ku saabsan xukunka, xukumida, xabsi is gelinta, iyo in mustaqbalka jir ahaan loo sii daayo ee ku eedaysanaha dembiilanimo ama dembiile la xukumay. (Qoddobka Dastuurka Oregon I § 42 (1)(b))

Xuquuqda Dhibbanaha: Xukunka Ka dib

- Marka la codsado, in la soo ogeysiiyo oo uu ka qayb galo rafcaanka (dembiyada qofka iyo tuugada aqalka 'burglaries' oo kaliya). (ORS 147.433(1)(b))
- Marka la codsado, in la soo ogeysiiyo marka xukun uu yahay mid khuseeya codsiga qoraalka rasmi ah oo loogu talagalay fududeynta xukunka ka dib ama baaritaanka DNA ee xukunka ka dib. (ORS 147.433(1)(c))
- Marka la codsado, in la soo ogeysiiyo kiisaska Dacwadaha Guddiga Dib u eegida Xanuunka Maskaxda ee loogu talagalay GEI (Dembiile la yahay Marka laga reebo in Maskaxda laga jiran yahay oo ay ku jiraan dhageysiyada, isa sii deynta shuruuda leh, iska saarida 'discharge' ama baxsashada. (ORS 161.326(1))
- Marka la codsado, in la soo ogeysiiyo Guddiga Xabsi ka sii deynta iyo dhageysiyada Kormeerka Xabsiga Ka dib. (ORS 144.750(2)(a))

Xuquuqda Dhibbanaha: Magdhawga khasaare la geystay

- In la magdhabo ku xad gudubka xuquuqo dastuuri ah. (Qoddobka Dastuurka Oregon I §§ 42(3)(a), 43(5)(a), ORS 147.500-147.533)
- Si aad u gudbiso sheegashada ku xadgudubka xuquuq, la xiriir
 - [Xarunta Sharciga ee Dhibbanayaasha Fal dembiyeedka ee Oregon,](#)
 - [Barnaamijka Xuquuqda Dhibbanayaasha Fal dembiyeedka,](#) ee Oregon DOJ
 - [Fiiri foomkani](#) si aad uga gudbiso maxkamadda

Ma rabtaa inaad ogaato waxa ay
damacsan tahay Qaybta Xuquuqda
Madaniga ah? Nagala soco
warbaahinta bulshada!



Oregon Department of Justice's

CIVIL RIGHTS UNIT

